## Casharka 50

1. Waa maxay asbaabta Shayddaanku u jirrabay Ciise?
-Waayo Shayddaanka wuxuu doonayey in Masiixu dembaabo.

2. Maxaa Shayddaanku u doonayaa in Ciise dembaabo?
-Waayo Shayddanku ma uusan doonaynin in Ciise badbaadiyo dadka.

3. Miyaa Masiixu awood u leeyahay inuu dhagxaan u rogo kibis?
-Haa.
-Ciise wuxuu ahaa Wiilka Ilaah, oo wuxuu ahaa Rabbi.
-Ciise wuxuu awood u lahaa inuu sameeyo wax waliba.

4. Muxuu Ciise u sheegay Shayddaanka oo ka qiima badnaa cunnada?
-Ciise wuxuu Shayddaanka ku yiri in la rumaysto Hadallada Ilaah ayaa wax badan ka qiima badan cunnada.

5. Inkastoo Ciise uu baahnaa, muxuu dhagaxda kibis uga dhigi waayey?
-Waayo Ilaaha Aabbaha ah kuma oran dhagxaanta kibis ka dhigo.
-Ciise Masiix maahayn inuu addeeco Shayddaanka.
-Ciise wuxuu addeecayaa Ilaaha Aabbaha ah.

6. Miyaa Shayddaanku garanayaa waxa lagu qoray Hadallada Ilaah, oo ah Baybalka?
-Haa.

7. Ha yeeshee muxuu Shayddaanku ku sameeyaa Hadallada Ilaah?
-Shayddaanku wuxuu kala rogaa ama qalloociyaa Hadallada Ilaah si uu dadka dabin ugu dhigo.



8. Maxaa keenay in Shayddaanku awood u yeesho inuu siiyo Ciise maamulka dunida oodhan?
-Waayo Aadan ayaa addeecay Shayddaanka, Shayddaankuna wuxuu noqday kii Aadan xukumay, wuxuuna dabeeto xukun ku haystay dadkii Aadan ka farcamay iyo dunida oo dhan.

9. Sidee buu Ciise kaga adkaaday Shayddaanka?
-Hadallada Ilaah.

10. Miyaa Ciise qalloociyey Hadallada Ilaah?
-Maya.
-Ciise wuxuu Hadallada Ilaah uga hadlay ama u soo xigray siada ay ugu qoran yihiin kitaabka Ilaah ee Baybalka.

11. Haddaba kuma ayaa weyn Ciise iyo Shayddaanka?
-Ciise.

12. Maxaa Ciise uga sii weynaaday Shayddaanka?
-Waayo Ciise waa Rabbi.
-Bilowgii, wuxuu ahaa Ciise kii Shayddaanka u sameeyey sida malaa'ig kaamil ah.

13. Maxaa Ciise Shayddaanka ku samaynayaaiyo jinniyadiisa mustaqbalka?
-Ciise wuxuu Shayddaanka iyo jinniyadiisaba ku tuurayaa harada dabka ah ee ololaysa.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa boqorkii sharka lahaa ee Boqor Herodos wuxuu dhigay xabsi Yooxanaa Baabtiisaha.

-Kaddib markii Yooxanaa Baabtiisaha la geliyey xabsi, Ciise wuxuu bilaabay inuu wax baro Yuhuudda.

Bal aynu akhrinno Markos 1:14

14-Kolkii Yooxanaa la qabtay dabadeed, Ciise wuxuu yiid Galilii, oo wuxuu dadka ku wacdiyey Injiilka Ilaah.

-Haddaba ilaa iyo imisa ayuu jiray Ciise markii uu bilaabay inuu Yuhuudda wax baro?

-Wuxuu jiray 30 sannadood.

-Ciise wuxuu Yuhuudda baray Akhbaarka Wanaagsan ee Ilaah.

-Muxuu ahaa Akhbaarka Wanaagsan ee Ilaah, kaasoo Ciise dadka Baray?

-Akhbaarka Wanaagsan wuxuu ahaa inkastoo ay ahayd in dembiga dadka oo dhan dhimasho lagu ciqaabo, haddana in Ilaah soo dirayo Badbaadiyo dadka dembiyadooda qaada.

-Waa kuma Badbaadiyaha Ilaah u soo dirayey inuu badbaadiyo dadka?
-Ciise.

-Maxaa kale ee Ciise dadka baray?

Bal aynu arkhinno Markos 1:15

15-Wuxuuna yidhi, Wakhtigii waa buuxsamay, oo boqortooyadii Ilaah waa soo dhowaatay, toobad keena oo Injiilka rumaysta.

-Maxaa Ciise uga gol lahaa markii uu yiri, Wakhtigii waa yimid,



oo boqortooyada Ilaah way soo dhowdahay?

-Ciise wuxuu ka hadlayaa imaanshaha Badbaadiyaha, iyo in boqortooyada Ilaah ay dhowaan wiiqi doonto boqortooyada Shayddaanka.

-Ciise wuxuu kaloo ina baray in dadku ay rumaystaan Hadallada Ilaah.

-Haddaba waa maxay dariiqa keliya ee qofku Ilaah uga farxin karo?

-Waa in la rumaysto Hadallada Ilaah.

-Markii Ciise bilaabay inuu Yuhuudda baro Hadalka Ilaah, wuxuu soo kaxaystay rag isaga la socon jiray, oo uu wax bari jiray.

Bal aynu akhrinno Markos 1:16-20

16-Markuu badda Galilii ag marayay, wuxuu arkay Simoon iyo walaalkiis Andros, iyagoo shabag badda ku tuuraya, waayo, waxay ahaayeen kuwa kalluun jiloaabta.
17-Ciise xuu ku yidhi, I soo raaca. Waxaan idinka dhigayaa kuwo dadka jillaabta.
18-Markiiba shabagyadoodii way ka tageen, wayna raaceen.
19-Markuu cabbaar socday, wuxuu arkay Yacquub ina Sebedi iyo walaalkiis Yooxanaa, iyagoo doonnida dhexdeeda shabagyadoodii ku hagaajinaya.
20-Markiiba wuu u yeedhay. Kolkaasay aabbahood Sebedi iyo shaqaalayaasha kaga soo tageen doonnida, oo isagay raaceen.
-Waa maxay asbaabta Ciise ugu yeeray raggaas inay u raacaan?

-Waayo Ciise wuxuu doonayey inuu iyaga wax baro, si ay iyaga u awoodsiiyaan inay sii baraan waxay Masiixa ka barteen ee Ilaah ku saabsan dadka kale.

-Maxay ahayd shaqada dadka qaarkii, kuwaasoo Ciise uu u yeeray?

-Qaarkood waxay ahaayeen kalluumaysato.

-Maalin, ayaa Ciise wuxuu yimid magaalada Kafarna'uum si uu dadkii Yuhuudda ahaa ee halkaas joogay wax u baro.

Bal aynu akhrinno Markos 1:21

21-Markaasay Kafarna'um galeen, oo markiia sabtidda wuxuu galay sunagogga oo dadka wax baray.

-Markii Ciise uu soo galay magaalaa Kafarna'uum, wuxuu soo aaday Sunagogta si uu dadka wax u baro.

-Waa maxay Sunagoota?

-Sunagogta waa Beyd Yjhuuddu ay ku kulmaan oo ku akhristaan kitaabka Ilaah ee Baybalka.

-Maxay u qaateen badanaa dadka Yuhuudda ah waxbariddii Ciise Masiix?

Bal aynu akhrinno Markos 1:22

22-Waxayna la yaabeen, wax bariddiisa, waayo, wuxuu wax u barayay sida mid amar leh, oo uma uu baraynin sida



culimada.

-Maxay badanaa dadka Yuhuudda ah ula yaabeen waxbariddii Ciise?

-Waayo Ciise wuxuu iyaga wax ku baray xigmad iyo xoog.

-Yey ahaayeen macallimada sharciga?
-Waxay ahaayeen Farristiinta.

-Sidee baa waxbariddii Ciise kaga duwanayd waxbaridda Farrisiinta?

-Waayo Ciise wuxuu ahaa Rabbi, oo wuxuu garanayey Ilaaha Aabbaha ah.

-Farrisiinta ma ayan garanaynin Ilaaha Aabbaha ah.

-Maaddaama Ciise uu ahaa Rabbi, wuxuu Hadallada Ilaah u yaqaannay si wanaagsan.

-Farrisiinta ma ayan garanaynin Haallada Ilaah.

-Maaddaama Ciise ahaa Rabbi, Ciise wuxuu rumaysnaa wax waliba ee ku qoran Hadallada Ilaah.

-Farrisiinta ma ayan rumaysan Hadallaad Ilaah.

-Intii uu ku jiray waxbariddii xerta, ayaa nin jinni qaba wuxuu bilaabay inuu qayliyo.

Bal aynu akhrinno Markos 1:23-24

23-Markaasaa waxaa sunagoggadii ku jiray nin jinni waskh leh qaba, wuuna qayliyey, oo wuxuu yidhi,
24-Maxaa inoo dhexeeya, Ciise reer Nasarreetow? Ma waxaad u timid inaad na baabi'iso? Anigu waa ku garanayaa kii aad tahay Kan Qoduuska ah ee Ilaah.

-Bilowgii, yey ahaayeen jinniyada intayan jinniyo noqon?

-Bilowgii, jinniyadu waxay ahaayeen malaaigo wanaagsan oo Ilaah abuuray ilaa ay markii dambe soo raaceen Shayddaanka oo noqdeen dulli.

-Jinniyada waxay jecel yihiin inay ku dhex noolaadaan dadka aan Ilaah rumaysanin.

-Jinnigu wuxuu haddaba ku noolaa ninkan qaylinayey.

-Miyaa jinnigu garanayaa kan waxbaraya dadka inuu Ciise ahaa?
-Haa.

-Miyaa jinnigu garanayaa in CiiseRabbi ahaa.?
-Haa.

-Miyaa jinnigu garanayaa in Ciise kaamil ahaa, oo qodduus ahaa, oo uu nebcaa dembiga?
-Haa.

-Miyaa jinnigu garanayaa in Ciise ahaa mid jinniga qudhiisa ka xoog badan?
-Haa.

-Maxay jinniyadu uga baqayeen Ciise?



-Waxay uga baqayeen waxay ahayd in Ciise awood u lahaa inuu iyaga ku tuuro Harada dabka ololaya wakhti walba.

-Jinniyada waxay aad u garanayaa in Ciise lahaa awoodda uu iyaga ugu tuurayo dabka wakhti waliba.

-Maxaa Ciise ugu jawaabay jinniyada?

Bal aynu akhrinno Markos 1:25-26

25-Ciise baa canaantay oo ku yidhi, Aamus oo ka soo bax.
26-Goortii jinnigii wasakhda lahaa gilgilay oo cod weyn ku qayliyey, ayuu ka soo baxay.

-Ciise wuxuu amar ku bixiyey in jinnigu ka soo boxo ninka.

-Miyaa jinnigu addeecay Ciise?
-Haa.

-Maxaa jinnigu u addeecay Ciise?

-Waayo Ciise waa Rabbi.
-Welibana Ciise wuu ka xoog iyo awood badan yahay jinniyada.

-Maxaa ddku ay u malaynayeen markii ay arkeen Ciise oo ninka ka badbaadinaya jinniga?

Bal aynu akhrinno Markos 1:27-28

27-Kulligoodba ayay la wada yaabeen, sidaa aawadeed iyaga dhexdooda way isweyddiiyeen oo yidhaahdeen, Waa maxay waxani? Ma wax barid cusub baa? Xataa jinniyadii wasakhda

lahayd amar buu ku amraa, wayna yeelaan.

28-Markiiba warkiisii waa gaadhay dhulkii Galilii ku wareegsanaa oo dhan.

-Dadkii aad iyo aad bay ula yaabeen in Ciise uu ninkii ka bixiyey jinniga.

-Dadkiina waxay kaloo la yaabeen in jinnigu addeecay ama maqlay Ciise.

-Wixii intaas ka dambeeyey, maxaa dhacay?

Bal aynu akrinno Markos 1:32-34

32-Makhribkii goortay qorraxdii dhacday, waxay u keeneen kuwa buka oo dhan iyo kuwa jinniyo qaba.

33-Markaasaa dadkii magaalada oodhan albaabka ku soo ururay.

34-Oo wuxuu bogsiiyey dad badan oo cudurro kala cayncayn ah qabay, dadkana jinniyo badan buu ka saaray, uma oggolaanin jinniyadu inay hadlaan, waayo, isagay garanayeen.

-Habeenkaas, dadkii waxay Ciise u keeneen kuwii jirranaa iyo kuwii jinniyada qabay, oo Masiixu wuxuu daweeyey iyaga oo dhan.

-Waxaa haddaba taas ugu wacan in Ciise Rabbi yahay.
-Iyo in Ciise wax waliba samayn karo.

-Maxaa Ciise u daweeyey dadka jirran oo dhan?

-Waayo Ciise aad buu u jecelaa iyaga.



-Waayo Ciise wuxuu ka xumaaday jirradooda.

-Bilowgii markii Rabbigu abuuray dunida, wax cudur ah lama arag.

-Ha yeeshee Aadan iyo Xaawo waxay ku dembaabeen Ilaah, wuxuuna dembigoodii ddka oo dhan u keenay cudur.

-Ciise wuxuu doonayey inuu dadka ka bogsiiyo jirrada dembigu keenay dunida.

-Maxaa Ciise u bogsiiyey dadka oo dhan, kuwaasoo jinni-qabayaasha ahaa?

-Waayo Ciise wuu jeclaa iyaga.-Waayo Ciise wuxuu ka xumaaday in jinniyadu dadka ay gumaysteen.

-Bilowgii, dadku waxay ahaayeen carruurtii Ilaah.

-Ha yeeshee Aadan iyo Xaawo waxay ku dembaabeen Ilaah, dadka ood hanna waxay noqdeen addoommada Shayddaanka iyo jinniyada.

-Ciise wuxuu doonayey inuu dadka ka xoreeyo gunnimada shayddaanka iyo jinniyada.

-Maalin nin baras qaba ayaa u yimid Ciise Masiix.

Bal aynu akhrinno Markos 1:40

40-Markaasaa waxaa u yimid nin baras leh, wuuna jilba joogsaday oo baryay, oo ku ydihi, Haddaad doonaysid waad i

daahirin kartaa.

-Miyaad garanaysaa waxa barasku yahay?
-Barasku waa cudur xun oo cuna jidhka.

-Wakhtigii Ciise, wax dawo ah ma lahayn barasku.

-Haddii adigu aad baras qabto, haddaba barasku dawo ma leh. Haddii aad baras qabto, caawimaad heli maysid.

-Miyaa haddaba ninkii baraska qabay isagu iska dawayn karayaa baraska?
-Maya.

-Wax dawo ah ma lahan barasku.

-Miyaa la helayaa nin kale oo noolaa wakhtigaas oo dawayn karay?

-Maya
-Oo dawo ma lahan cudurku.

-Maxaa ninkaasu haddaba ugu yimid Ciise?

-Wuxuu ugu yimid in Ciise kelidii uu awooday inuu bogsiiyo isaga.

-Miyaa Ciise bogsiiyey isaga?

Bal aynu akhrinno Markos 1:41-42

41-Kolkaasaa Ciise u naxariistay, oo intuu gacantiisa soo



taagay, ayuu taabtay oo ku yidhi, Waa doonayaa ee daahirsanow.
42-Kolkiiba baraskii waa ka baxay, oo wuu daahirsanaaday.

-Ciise wuuu taabtay ninkii oo wuxuu yiri, Daahirsanow, oo ninkiina wuu gobsaday.

-Ciise oo keliya oo Rabbi ah ayaa awooday inuu badbaadiyo ninkan.

-Sidee baa dembiga loola simi karaa baraska?

-Marka qofku aanu awood u lahayn inuu iska badbaadiyo baraska, markaa dadka oo dhan ma awoodaan inay iska badbaadiyaan dembiga.

-Sida haddaba aanay dadka kale oo dhan u awoodin inay baraska bogsiiyaan, ayaanu u jirin qof awoodaya inuu dadka ka bogsiiyo dembiga.

-Ciise wuxuu u yimid dunida inuu inaga bogsiiyo dembiga.

-Ciise wuxuu kaloo udnida u yimid inuu inaga bogsiiyo dhimashada.

-Ciise wuxuu kaloo dunida u yimid inuu inaga badbaadiyo Shayddaanka.

-Ma jiro haddaba qof kale oo ina bogsiin kara; Ciise oo keliya ayaa ina badbaadin kara.